# Baadhitaan lagu baadhayo aqoonta akhriska ee ardeyda fasalka 2-aad dhigta

Waalidka sharafta lahow,

Adiga iyo ilmahaaga waxaa laydinku casuumayaa inaad ka soo qaybqaadataan baadhitaanka aqoonta akhriska ee ardeyda fasalka 2-aad dhigta Baadhitaanka waxaa si wadajir ah looga hirgalinayaa waaxda tarbiyadda iyo tacliinta ee magaalada Helsinki iyo jaamacada Aalto, jaamacada Jyväskylä iyo jaamacada Turku oo intuba ka wada shaqaynaya. Waxaa baadhitaanka lagaga gungaarayaa saameynta ay qaababka waxqabad ee kala duwan ku leeyihiin kobaca aqoonta akhriska ee ardeyga.

## 1. Baadhitaanka ujeedadiisu waa maxay?

Waxaa baadhitaankan ka qaybqaadanaya 34 dugsi oo magaalada Helsinki ku yaalla oo helaya dhaqaalo dheeraad ah oo baahi ku saleysan. Ujeedada dhaqaalaha dheeraadka ah ee baahida ku saleysan waa in la simaa farqiyada u dhaxeeya dugsiyada ku dhex yaalla magaalada Helsinki. Ardeyda fasalka 2-aad dhigta ayaa qaab bakhtiyaanasiib ah looga xushay fasalada tijaabada ah iyo fasalada la barbar dhigayo. Fasalada tijaabada ah waxaay xiisadda luqadda hooyo u helayaan hal macalin oo dheeraad ku ah macallinka fasalka. Macallinka dheeraadka ah waa macalin leh tacliinta macallinka baahida gaarka ah ama macallin dhiga maaddada af finnishka luqadda labaad ah (S2). Fasalada tijaabada ah si caadi ah ayaa looga qabanqaabinayaa barista luqadda hooyo.

Baadhitaanka ardeyda ku jira waxaay ka qaybqaadanayaan qiimeynta awoodahooda fasalka 2-aad muddada deyrta iyo guga iyo muddada deyrta ee fasalka 3-aad. Qiimeynta waxaa ku jira casharo wax akhris ah, qoraal ah iyo xisaab. Ardeydu waxaay qiimeyntaas ku sameynayaan internetka waxaayna qaadaneysaa labo xiisadood. Intaas waxaa dheer in macallimadda fasalku ay qiimeynayso ardeyda xirfadahooda dareenka iyo wada dhaqanka iyo sidoo kale awoodohooda waxqabad. Jawaabaha soo baxa ayaay cilmi-baadheyaashu ku qiimeynayaan saameynta ay qaababka waxqabad ee kala duwan ku leeyihiin kobaca aqoonta akhriska ee ardeyga.

## 2. Waa maxay sababta ilmahaaga loogu casuumay baadhitaanka?

Baadhitaanku wuxuu qayb ka yahay shaqada qiimeynta tayada ee sharcigu dhigayo in lagu fuliyo magaalada Helsinki. Dugsiga ilmahaagu wuxuu kamid yahay 34-ta dugsi ee laga doortay nawaaxiga Helsinki ee ka qaybqaadanaya baadhitaanka. Baadhitaankan waxaa loo diray dhammaan ardeyda fasalka 2-aad dhigta ee baadhitaanka ku jira.

## 3. Xog noocee ah ayaa baadhitaanka lagu ururinayaa?

Baadhitaanka waxaa lagu ururinayaa xog ku saabsan aqoonta akhriska iyo qoraalka ee ardeyda iyo awoodaha guud ee xisaabta iyo sida ay ardeydu u xiiseeyaan

akhriska iyo xisaabta. Intaas waxaa dheer in macallinku uu waydiimadiisa gaarka ah ku qiimeynayo awoodaha dareenka iyo wadadhaqanka ee ardeyda iyo awoodahooda waxqabadka.

## 4. Maxaa ku dhacaya xogta la ururiyay?

Xogta qiimeynta waxaa lagu keydinayaa nidaam xogtu ku ilaashantahay oo ay jaamacadda Turku leedahay. Kooxda baadhitaanka ayaa markaas kaddib xogta u diraysa Tilastokeskus (Xarunta tira-koobka) oo lagu buuxbuuxinayo xogta diwaangelinta lagagana saarayo macluumaadka sida tooska ah shaqsiga u khuseeya.

**Qof ka mid ah ka qaybqaateyaasha baadhitaanka oo la aqoonsan karo ma jiro.**

## 5. Wax su'aal ah?

Haddii aad qabto su'aalo ama aad macluumaad dheeraad ah uga baahantahay baadhitaanka waxaad iimayl ku diri kartaa cinwaanka tp.tutkimus@hel.fi. Waxaad sidoo kale la soo xidhiidhi kartaa maamula dugsigaaga.

## 6. Ilaalinta ammaanka xogta iyo xuquuqdaada

Macluumaadka shaqsiga ee ilmahaaga looga baaraandegayaa si ammaan leh. Macluumaadka iyo waraaqaha baadhitaanka lagu fulinayo waxaa kaliya xor u ah inay gacanta ku dhigaan cilmi-baadheyaasha fasax u helay baadhitaanka. Xogta la ururinayo, ka baaraandegistooda iyo keydintooda waxaa lagu sharraxay qoraalka ilaalinta ammaanka xogta lagaga hadlayo. Qoraalka ilaalinta ammaanka xogta waxaa laga akhrisan karaa cinwaanka https://educaflagship.fi/fi/tietoa-tutkimuksesta/tutkimusalue-1/lukutaidon-interventiotutkimus/tietosuojaseloste.

Sharciga guud ee loo dajiyay ilaalinta ammaanka xogta (GDPR) wuxuu dhigayaa inaad xaq u leedahay inaad hubiso macluumaadka ilmahaaga khuseeya, inaad codsato in la saxo ama in la xadeeyo falanqayntiisa iyo inaad ka horjoogsato falanqaynta macluumaadka iyo wareejintooda. Si aad xuquuqdaadaas u adeegsato u soo dir iimayl cinwaanka tp.tutkimus@hel.fi.

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo khuseeya falanqayntaas ama codsiyo dheeraad ah, u soo dir iimayl cinwaanka tp.tutkimus@hel.fi.

## 7. Ka qaybqaadashada baadhitaanka

Ardeydu inay baadhitaanka ka qaybqaataan ma aha khasab ee waa ikhtiyaari. Ka baaraandegista macluumaadka shaqsiga ah waxaay ku salleysantahay baadhitaan cilmiyaysan iyo qiimeynta tayada waxbarashada oo sharciga ku xusan. Waalidku kuma khasbana inuu oggolaado in ilmihiisu ka qaybqaato. Waxaase u bannaan inuu diido inuu ilmihiisu ka qaybqaato isagoo ogaysiis dheeraad ah ka bixinaya oo aanan

ku khasbanayn inuu sabab gaar ah sheego ama isagoo aanay wax cawaaqiib ah ka raacaynin.

**Haddii ilmaahaga aad u oggolaan waydo inuu baadhitaanka ka qaybqaato, u dir iimayl maamulaha dugsigaaga oo soo sheeg ilmahaaga magaciisa iyo fasalkiisa.**